



SKÖVDE

Macluumaad loogu talo galey waalid qaanuuneedyada

Ku soo dhawaada dugsiyada xanaanada caruurta ee degmada Skövde. Iyada oo aaysan ku xindhneyn dugsiyada xanaanada caruurta ee lagu meeleyn doono ilmahaaga, waxaa aan warqdan ku soo ururineyn macluumaad ay ulajeedadiisu tahay in kor loogu qaado ka qayb qaadashada waalidiinta mudada lagu gudo jiro todobaadyada hordhaca ee uu ilmuhu ku cusubyahay xananada (inskolningsprocessen) iyo waliba in lagu bayaansho xeerarka iyo hab dhaqanka khuseeya dugsiyada xananada caruurta ee degmada Skövde.

Mudada hordhaca (Inskolning)-waxaa loo yaqaanaa mudada ugu horeysa ee uu ilmuhu bilaabaayo dugsiyada xanaanada. Mudada horadhacu (Inskolningsperioden) waa ay kala du-duwantahay taas oo ku xidhan dugsiyada xanaanada ee kala duwan, laakii sida caadiga waxaaay qaadataa qiyaastii mudo labo todobadad ah. Mudada hodhaca (Inskolningsperioden) waxaa ay macnaheedu tahay in ilmaha iyo waalidka oo wadajiraa ay bartaan, dugsiyada xanaanada, shaqaalaha ka shaqeeyaya dugsiyada xanaanada iyo caruurta kale ee dhigata dugsiyada xanaanada. Mudada hodhaca (Inskolningsperioden) waxaa aad ka waalid ahaan isha ku hayn doontaa sida ay tahay nolol maalmeedka ilmahaaga mudada uu ku suganyahay dugsiyada xanaanada, waxaa kale oo aad ogaan doontaa sida uu u shaqeeyo dugsiyada xanaanadu, waxaa sidoo kale aad fursad u heli doonataa in aad noo sheegto waxyaabaha uu ilmahaagu xiiseeyo, waayo argnimadiisa iyo baahdiisa. Ka waalid ahaanaa waxaa aad ka qayb qaadan doontaa mudada hordhaca (inskolningen).

Waktiyada ay furanyihiin (Öppettider)-Dugsiyada xananada caruurta ee ku yaala degmada Skövde waxaa ay sida caadiga furanyihiin inta u dhaxarysa saacdaha 06.30-18.30

Qorsheynta jadwalka (Schemaplanering)-Aad bey muhiim in jadwala loo gudbinayo dugsiyada xanaada uu yahay mid sax ah, in ilmaha la keeno lana qaado wakhtiga ku qoran jadwalka ee la go'aamiyey. Haddii uu ku yimaadao wax isbedel wakhtiyadiina shaqada, waa in la badelo jadwalka ilmaha ee xanaanda. Waa in la wargeliyaa shaqaalaha haddii uu jadwalku isbedelo. Jadwal waxaa loola jeedaa wakhtida shaqada/wakhtiyada wabarashada + safarka.

Caruurta dhigta dugsiyada xanaanda ee ay waalidiintoodu ku jiraan fasax waalidnimo ama ay ay yihiin shaqo raadiyaal waxaa ay xaq u leeyihiin 15 saacadood todobaadkii in ay tagaan dugsiyada xanaanada caruurta.

Dugsiyada xanaanada caruurta ee guud (Allmän förskola)- Laga bilaabo xiliga deyrta ee uu ilmuhu uu buuxiyo saddex jir, waxaa ay xaq u leeyihiin dugsiyada xanaanda caruurta ee guud, taas oo ay macaheedu tahay in ilmuhu xaq u leeyahay in uu tego dugsiyada xanaanda caruurta ee guud 15 saacadood todobaadkii, kaas oo bilaa lacag ah, waxaana codsanya waalidka in ilmuhu tago dugsiyada xanaanda.

Maalmaha qorshe dejinta (Planeringsdagar)-Afar maalmood ayuu dugsiyada xanaanadu xidhanyahay sandkii si loo sameeyo qorshe dejin iyo waxbarasho loo sameeyo shaqaalaha. Ugu yaraan laba bilood ka hor ayaan sii wargelinaa maalinta la xidhi doono dugsiyada xananada.

Isku geeyn (Sammanlagning)-Mudada lagu gudo jiro fasaxayada, wakhtiga kuleylaha iyo ciidaha masiixiga waa ay wad shaqeeyaan dugayada xanaanadu. Taas oo ay macnaheedu tahay inay dhici karto in dugsiyada xanaanada ee uu ilmahaagu tago uu xidhanyahay isla markaana aad ilmaahaga geyn doonto dugsi kale oo xanaano mudadaas. Shaqaale caruurta ay garanayaa ayaa markaas u raacaya xanaanada kale.

Keenista iyo soo qaadista (Hämtning och lämning)-Marka aad keeneystaan ama qaadeystaan caruurtiina aad mey muhiim u tahay in aad la xidhiidhaan shaqaalaha, si ay shaqaaluhu u ogaadaan in aad timaadeen oo aad qaadeen ama maca salaameyseen caruutiina. Waa in aad mar kasta wargelisaan shaqaalaha haddii qof kale keenayo ama qaadayo ilmahaaga. Shaqaaluhu uma dhiibi doonaan caruurtiina qof kale haddii waalidku uusan ogolaan/ama soo wargelin.

Jiro (sjukdom)- Marka ilamihinu xanuunsado/jirado waa in ilmahaagu joogaa guriga. Waa in aad mar kasta soo wacdaa xanaanda oo aad wargelisaa marka ilmuhu xanuunsanyahay. Waa in aad sidoo kale soo wacdaa xananada oo aad soo wargelisaa maalin ka hor marka uu ilmahaagu soo noqonayo. Aad bey muhiim u tahay in ilmuhu si fiican u caafimaado inta uusan dib ugu soo laaban xanaanada, si uu ilmuhu u awoodi karo in uu joogo xananada iyo in sodoo kale loo dhimo halista ah in uu fido xanuunku. Haddii ilmaha qandhoa/xumad qabato waa in uu joogaa guriga hal maalin oo uu bilaa xumad/qando yahay.

Marka uu jiro calool xanuun/matag/shuban waa in uu uuilmuhu ka caafimadaa xanuunka 48 saacadood ka hor inta uusan ku soo laaban xanaanada. Maadama ay aad u sareeyso halista ah in xanuunku fido waxaa haboon in xitaa caruurta la dahalatay ilmaha calooshu xanuuneyso iyaga laftoodu joogaan guriga.

Maalin caadi ah waxyaabaha ka dhaca xanaanada (En vanlig dag i förskolan)-Farqi baa u dhaxeyn kara wakhtiyada dugsiyada xanaanada ee kala duwan

Saacada. 6.30 Waxaa la furaa xanaanada. Ilaa inta laga gaadhayo wkhtiga la cunayo qureecada waa ay ciyaari karaan ama wax bey sawiri karaan caruurta.

Förskolan öppnar. Fram till frukost kan barnen leka, rita, etc.

Saacada. 8.00 Qureec.

Inta u dhaxeyso qureecda iyo qadada waxaa caruurta lagu marti qaada hawlo firfircooni oo kala duwan sida, in ay ciyaaraan, muusiko, hawlo wax lagu curinayo. Galinka hore waxaa hawlaha qaarkood ay ka dhacaan banaanka. Waxaa caruurta la siiyaa khudaar.

Mellan frukost och lunch erbjuds barnen olika aktiviteter som lek, musik, skapande verksamhet. På förmiddagen bedrivs delar av verksamheten utomhus. Barnen erbjuds frukt.

Saacada. 12.00 Qado.

qadada ka dib waxaa caruurta lagu marti qaada mudo yar oo nasosho ah, mudadaas oo ay caruurta seexaan karaan ama dhageystaan sheeko xariir. Nasashada ka did waxaa caruura lagu marti qaada hawlo firfircooni ah oo ka dhaca gudaha ama banaanka ilaa inta laga gaadhayo wakhtiga cuwaafta.

Saacada. 15.00 Wakhtiga cuwaafta, waxaa sida caadiga ah la cunaa is maris iyo caano.

Cuwaafta ka dib ilaa inta ay guriga ka tagyaan waxaa caruura lagu marti qaada hawlo firfircooni ah oo ka dhaca gudaha ama banaanka.

Saacada 18.30 Waa la xidhaa dugsiyada xanaanada.

Joogitaanka banaanka (Utevistelse)-I Dugsiyada xaanaanada caruurta banaanka ayey u baxaan caruurta maalin kast. Taas oo ay macnaheedu tahay in ilmahaagu u baahanyahay dhar ku haboon cimilada sida dharka roobka, kabaha roobaka (gummiskor), jaakad diiran, Surwaalka laga kor gashado oo dharka ka ilaaliya wasakhda (överdragsbyxor) ama koofiya qoraxda. Waxaa uu ilmahaagu sidoo

klae u baahan karaa **dhar dheeri** (surwaal, funaanad, sigasaan/sharabaado, kalsoon) oo uu ku bedeso haddii dharka uu xidhanyahay ay ka qoyaan ama ka wasakhoobaan.

Nasashada (Vila)- Qadada ka dib waxaa caruurta lagu marti qaadaa nasasho, caruurta yara waaweyn ee da'doodu tahay 3-5 sano waxaa lagu marti qaadaa in kor loogu akhriyo sheeko xariir. Caruurta yaryar ee da'doodu tahay 1-3 sano waxaa ay mudo yar oo gaaba ku nastaan/seexdaan furaasha yaala gudaha ama vaagen yaala banaanka. Xanaanooyin badan waxaa ay caruurta ku seexdaan Vaagnayaashooda syaala banaanka xiliyada sanadka oo dhan.

Cuntada (Mat)- Dugsiga xanaanadu waxaa uu ku marti qaadaa caruurta qureec, qado iyo cuwaaf. Wakhtiyada cuntadu waa kuwo bilaa lacag ah. Haddii ay jirto baahi loo qabo cunto gaar ah waxaa la wargelinayaa dugsiga xanaanada